

Warmurtiyeedka Shirka Wasiirada Maaliyadda iyo Maamulka Gobolka Banaadir

Kismayo, Jubaland
22/12/2019

Shirka Wasiiradda Maaliyadda Dalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir oo ay soo qaban qaabisey Wasaaradda Maaliyadda DFS ayaa lagu qabatay magaalada Kismayo, Jubaland inta u dhaxeysay 19-22 December, 2019 si ay uga wada hadalaan qodobada maaliyadda ee lagu dari karo cutubka maaliyadda ee Dastuurka dib-u-eegistiisu socoto iyo sidoo kale ka doodista habka la isu-waafajin karo nidaamka lagu maareeyo xogta maamulka maaliyadda dalka. Shirkaan ayaa daba socday shir lagu qabtay November 23-keeda magaalada Kampala ee dalka Uganda oo looga hadlaayay arrimo dhowr ah oo la xiriira maamulka maaliyadda dalka.

Shirka waxaa shir guddoomiyay Wasiirka Maaliyadda DFS mudane, **Cabdiraxman Ducaale Beyle** iyadoo ay ka soo qeyb galeen Wasiirka Maaliyadda Puntland, Wasiirka Maaliyadda Jubaland, Wasiirka Maaliyadda Koonfur-Galbeed, Wasiir Dowlaha Maaliyadda Hirshabelle, iyo wakiilo ka socoday maamulka Gobolka Banaadir. Waxaa shirka si cudur daar rasmi ah uga baaqday Wasiirka Maaliyadda Galmudug isagoo codsaday in Agaasimahiisa Guud uu shirka ku matalo.

Wasiiradu ka dib markii ay dhagaysteen talo soo jeedinta guddiga farsamdo waxay isla qaateen qodobada hoos ku xusan in la tix-geliyo:

B. Soo jeedinta qodobada Maaliyadda Dastuurka lagu dari karo

Guddiga farsamada dood iyo daraasayn dheer ka dib waxay ay soo jeediyeen in qodobada hoos ku qoran lagu daro dastuurka loona gudbiyo guddiyada iyo Wasaaradaha Dastuurka si ay u tix geliyaan. Qodobada waa qodobo mabadii' ah oo ka maqan dastuurka hadda qabyada ah, muhiimna ay tahay in lagu daro dib-u-eegista dastuurka si ay u sahlanaato ka wada xaajoodkooda.

Qodobada la soo jeediyay waa sida hoos ku xusan:

1. Kala saaridda Awoodaha dakhli ururinta, (Revenue/Tax Raising Power);
2. Hannaanka qoondaynta dakhliga, (Revenue Allocation Mechanism);
3. Xafiiska Hanti Dhowrka Guud, (Office of the Auditor General);

Handwritten signature: Rari

Handwritten signature: D. Y. K. P.

Handwritten signature: Ahmed

Handwritten signature: [unclear]

Handwritten signature: [unclear]

Handwritten signature: [unclear]

4. Daymaha iyo amaah qaadashada (Public Debt and Borrowing)

F.G: DXDFS waxay muddo afar (4) cisho ah gudahood oo ku eg 26-ka bisha December, 2019 ku soo gudbinayaan qodob dheeri ku ah afartaan qodob oo lagama-maarmaan loogu arko in lagu daro qodobada maaliyadeed ee loo gudbinaayo Wasaaradda Dastuurka DFS.

T. Iswaafajinta Nidaamyada (Harmonization of the FMIS)

Guddiga farsamadda iyagoo tix-geliyay soo jeedimaha DXDFS ee ku aadan ka doodista nidaamka xogta maaliyadda ayaa waxay dood dheer ka yeesheen habka isticmaalka xogta maaliyadda ee ay isticmaalaan afar kamid ah DXDFS. Falanqayn iyo dood dheer ka dib waxaa si wada jir ah la isula qaatay:

- 1) In iyada oo la tix-galinayo muddada kala-guurka taageeridda Afarta maamul, laga fekero sidii afartaan maamul (Jubbaland, Galmudug, K.Galbeed iyo Hirshabeele) ay ugu wareegi lahaayeen hab-xogeed maamul maaliyadeed ee iyagu iska leeyihiin, (Bespoke) muddo sanad gudaheeda ah;
- 2) In Afarta maamul ay soo gudbiyaan soo jeedintooda ku aadan cidda ugu haboon ee gacan ka gaysan karta horumarinta system-ka kama dambays 20-ka bisha February 2020;
- 3) Iyadoo laga duulayo midaynta nidaamka maaliyada dalka ayaa waxaa soo baxay isu dheeli tir la'aan xirfadda/aqoonta shaqaalaha Maaliyadda dalka. Hadaba, si arintan xal loogu helo, mashruuca PREMIS waa inuu bixiyaa awood kobcin buuxda oo la siman tan Federalka iyo Puntland isla sanadka 2020 gudihiisa.

X. Arrimaha bartilmaameedyada (FMSs benchmarks)

Guddigu wuxuu soo jeediyay in dhammaan DXDFS ay soo gudbiyaan soo jeedimaha bartilmaameedyada (Benchmarks) ugu dambayn 20ka February 2020

KH. Xog - Wadaagga maaliyadda dalka

Kulanka Wasiiradu waxaa isku raaceen in dhammaan xogaha maaliyadeed si joogto ah loo wadaago iyadoo la isku raacay shax maaliyadeed, (Informaiton sharing matrix)

Gebo-gabo – Kulankaan kulanka xiga waxaa lagu qabanayaa magaalada Baydhowa 1da bisha Maarso, 2020

Qiri

D. y. h. L. P

Ahmed

[Signature]


[Signature]

[Signature]

Saxiixayaasha:

1. Cabdiraxmaan Ducaale Beyle

Wasiirka Maaliyada DFS




2. Hassan Shire Abdi

Wasiirka Maaliyadda Puntland



3. Abdirashid Jire Khaline

Wasiirka Maaliyadda Jubbaland



4. Ahmed Mohamed Hussein

Wasiirka Maaliyadda K. Galbeed



5. Saciid Siyaad Shirwac


/ Omar Hassan DG

Wasiirka Maaliyadda Galmudug




6. Luqman Haji Maxamud Maxamed

Wasiiru dowlaha Maaliyadda Hirshabeele



7. Ibrahim Omar Mahadle

Guddoomiye K/Xigeenka M. Maaliyadda Gobolka Banaadir



Reporting Period	Reporting Requirements	Banadir Regional Administration	Galmudug State Somalia	Hirshabelle State Somalia	Jubbaland State Somalia	Puntland State Somalia	South West State Somalia	Federal Government Somalia	Total
2020 Q1	1. Total amount of Exports?								
	2. Total amount of Imports?								
	3. Total amount of collected Tax Revenue ?								
	4. Total number of TIN's issued?								
	5. Total registered Tax Payers?"								
	6. Share all approved PFM state laws"								
2020 Q2	1. Total amount of Exports?								
	2. Total amount of Imports?								
	3. Total amount of collected Tax Revenue ?								
	4. Total number of TIN's issued?								
	5. Total registered Tax Payers?"								
	6. Share all approved PFM state laws"								
2020 Q3	1. Total amount of Exports?								
	2. Total amount of Imports?								
	3. Total amount of collected Tax Revenue ?								
	4. Total number of TIN's issued?								
	5. Total registered Tax Payers?"								
	6. Share all approved PFM state laws"								
2020 Q4	1. Total amount of Exports?								
	2. Total amount of Imports?								
	3. Total amount of collected Tax Revenue ?								
	4. Total number of TIN's issued?								
	5. Total registered Tax Payers?"								
	6. Share all approved PFM state laws"								
"In a separate document, attach the information for each individual Tax Payer ** Includes Revenue Bill, Procurement Bill, Audit Bill and PFM Bill									



